(**<u>Ku Socota Shaqaalaha iyo Qoysaska</u>: Fadlan isticmaal Gacanta Caawinaadka V-157 *Badqabka Daawada* – ee macluumaad badqabka *Guud*.**)


# Intranasal Midazolam (Nayzilam®) Buufiska

## Intranasal Midazolam (Nayzilam®) Spray (Somali)

Midazolam waa magaca sooyaalka ee Nayzilam®. Daawadu waa dhibco yar yar oo sanka laga siiya oo si degdeg ah loo nuugo. Waxay ka shaqeysaa maskaxda si ay u joojiso qallalka taxanaha ah iyo qallalka daba dheeraada. **Qallalka taxanaha waxay**. **Qallalka daba dheeraada** waxa uu socdaa wax ka badan 5 daqiiqadood. Qallaka waa in uu ku joogsadaa 5 daqiiqo dhaxdooda kadib markii la siiyo daawcada.

### Digniin

Haddii ilmahaagu xasaasiyad ku qabo daawada midazolam-ka ha siinin daawadan. Ka eeg bogga 3-aad calaamadaha falcelinida xasaasiyadda iyo "Goora ay tahay in lawacaayo 911".




**Sawirka 1** Qalabka daawada midazolam

### Siinta daawadaan

- Ha ka saarin dawada baakadda ilaa loo baahan yahay moyee.
- Midazolam waxaa laga siiyaa sanka (gudaha sanka).
- Qalabka sanka lagu buufiyo ee midazolam waxa uu leeyahay biifbiifle, fara-qabsi, iyo tuubeeyaha (Sawirka 1).
- Qalabka sanka lagu buufiyo waxaa la isticmaali karaa hal mar oo kaliya. **Ha Isku dayin inaad baroobeysid qalabka ama aad diyaarisid isticmaalka ka hor. Waxaad qasaarineysaa garoojada.**


©2023, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Si taxadar leh u akhri qoraalka u dul qoran. Hubi inaad siisay garoojada saxda ah ee daawada saxda ah.
- Ilmahaaga la joog ilaa inta ay suuxdintu joogsato.
- Midazolam ma beddelayso dawooyinka kale ee canugaaga. **Ha joojin daawooyinka kale** adiga oo aan la hadlin dhakhtarkooda ama bixiyaha xanaanada caafimaadka.


## Sida loo siiyo

1. Markaad diyaar u tahay inaad isticmaasho, ku qabo baakadda calaacalaha gacantaada. Dusha dambe ee foil-ka cad marsan, raadi tabka 'Peel Here' "Fiiq xagaani" oo hoos u soo jiid (Jaantuska 1).
2. Si taxadar leh uga saar qalabka lagu buufiyo sanka.
3. Haddii canugaaga uu leeyahay duuf, nadiifi sanka ka hor inta adan siinin daawada.
4. Ku qabo qalabka sanka lagu buufiyo suulkaaga oo badhanka iyo fartaada geeska iyo faraha dhexe labada dhinac ee sanqada (Jaantuska 2). **Hoos HA u riixin**.
5. Si toos ah ugu qabo madaxa canuga gacmahaaga oo aadan waxba ku haynin. Saar caarada 1 dalool sanka ilaa farahaaga labada dhinac ee sanka ay taabtaan xagga hoose ee sanka (Jaantuska 3)
6. Riix badhanka si adag si aad u siiso qiyaasta buufinta sanka (Jaantuska 4).
7. Qofku UMA BAAHNA inuu si qoto dheer u neefsado markaad siiso daawada.
8. Haddii tilmaamaha la rabo in la geliyo hal buufin sanka kasta, raac tilmaamaha kor ku xusan adiga oo isticmaalaya qiyaas **cusub** oo sanka lagu buufiyo **sanka kale**.

Jaantuska 1




Jaantuska 2



Jaantuska 3



Jaantuska 4



## Wax yeelada Surtagalka ah

- Hurdo la'aan
- Madax xanuun
- Si fudud u kacda caloosha (kicin)
- Lalabo
- San cabursan
- Wareer
- Xajiin sanka ah
- Isbeddelada neefsasho

## Goorta aytahay in la Waco Dhakhtarka

Wac dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii waxyeellooyinku sii socdaan ama ay dhibaatooyin keenaan. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, hubi inaad weydiiso dhakhtarka, kalkaalisada, ama farmashiistaha.

## Goorma ayay Tahay In La waco 911

Joog iyo ilaali kadib markaad canugaaga siiso daawada.

**Wac 911 haddii**:

- Ilmahaagu uu leeyahay mid ka mid ah calaamadahan falcelinta xasaasiyadda:
  - Ku dhibtoodo neefsashada
  - Bararka carrabka, gacmaha, cagaha, ama canqawyada
- Ilmahaagu uu qabto suuxdin soconaysa in ka badan 5 daqiiqo ka dib marka la siiyo midazolam.
- Ilmahaagu uu leeyahay suuxdin aad u daran ama u dhaca in ka badan sidii hore.
- In midabka ilmahaagu uu yahay cawl ama buluug, neefsashaduna ay tahay mid gaaban.
- Ay jirto dhibaato kale oo adiga quseysa.
- Uu dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha xanaanada caafimaadka kugu yiri inaad sidaas samayso.

## Kaydinta iyo tuurista

- Marwalba ku haay daawada weelka asalka ah ee farmashiga.
- Haku haynin daawadaan farintijeerka. Ku keydi daawada heerkulka caadiga ah.
- Haddii aad daawo ku sidato shandadaada ama shandadaada, ku ilaali meel aanay gaarin carruurta iyo xayawaanka rabaayada ah.
- Ha isticmaalin dawadan ka dib taariikhda dhicitaanka ee lagu daabacay baakadda.
- Fogeey (tuur) qalabka buufinta sanka iyo baakadaha ka dib marka la isticmaalo.
- Tuur dawo dhacday ama dawo aan hadda looga baahnayn kaydka dawooyinka. Waxaad kuwan ka heli kartaa www.rxdrugdropbox.org.